

PHASE 2

Shaqaalaha Guriga Liiska



City of Seattle

*#SupportSeattleSmallBiz
#WeGotThisSeattle*

Dulmar Guud

Waa maxay Wajiga 2aad?

Wejiga 2-aad wuxuu u oggolaanayaa ganacsiyada qaarkood iyo in ay ku soo laabtaan howshooda iyada oo la raacayo hagitaan adag ee xagga caafimaadka iyo amniga bulshada. Xubnah qoyska, shaqsiyaadka iyo ganacsatada u baahan tilmaamid gaar ah ayaa ka dalban karata [Washington State Coronavirus Response page \(English only\)](#), wac Waaxda Gobolka Washington ee Waaxda Shaqada & Warshadaha ee gobolka Washington taleefanka 1-800-547-8367, tarjumaad ayaa la heli karaa ama waxay kula xiriirsiin karaan shaqaalaha Xafiiska Horumarinta Dhaqaalaha in ay ku caawiyaa 206-684-8090, turjumaad ayaa la heli karaa.

Tilmaamahaan iyo shuruudahan waxay khuseeyaan dhamaan shaqaalaha adeega guriga ee la qorayo oo ay ku jiraan shaqsiyaadka, xubnaha qoyska, iyo meheradaha - kuwaas oo si toos ah ama si aan toos ahaynba u qabta shaqada guriga si ay u bixiyaan adeegyo, caruur heynta, guri nadiifin, cunto karin, ama maamule guri. Haddi meesha ay ka badan yihiin hal shaqaale ah, mid walbaa mas'uul buu ka yahay inuu buuxiyo shuruudahan.

Ku ka shaqeeya waxaa lagu dhaqayaa sharuudo ka duwan oo ay qeexayaan nidaamka dayactirka dibata ee halakan laga helayo, [found here](#).

Goorma ayaa Wajiga 2 bilaabmayaa?

King County waxey gashay wajiga 2aad laga bilaabo Juun 22. Waaxda caafimaadka ayaa kala noqon karta mudnaantan waqtiga ay doonto. Tusaale ahaan, haddii tirada COVID-19 ay korodho, waxaan ku laaban karnaa wajiga 1.5 ama Wajiga 1.

Waa maxy ula jeedaa Wajiga 2 Adeegyada Guriga?

Marka loo eego tusaha wejiga 2-aad, adeegyada guryaha ee hey'adu qoraneysa waa in ay raacaan shuruudaha caafimaadka iyo badbaadada qaarkood ee adeegyada guriga, oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn:

- Waxaad siisaa shaqaalahu gurigu qalabka la isku ilaaliyo (PPE) oo aan shaqaalaha wax qiimo ugu fadhiyin;
- Xaddid is-dhexgalka fool-ka-foolka ah ee shaqaalaha guryaha mar alla markii ay suurtagal tahay iyo / ama ay ka tagaan guriga markuu adeegu dhamaado; iyo
- Aad si joogto ah u nadiifiso oo jeermiga ka disho qalabka iyo dusha sare

Xageen ka heli karaa macluumaad dheeri ah?

Magaalada ayaa wadeysaa in ay sii gudbisno macluumaadka ku saabsan Gobolka isla mark aan helno. Agab kasta oo ay Magaaladu abuurto waxay noqon doontaa mid lagu heli karo luqaddo kale. Isla markaas, waa inaad booqataa [Washington State Department of Labor & Industries \(L&I\) website](#) (English only) Waxii macluumaad ah ee ku saabsan tilmaamaha dibu furida. Waxaad ka heli kartaa [Governor's Phase Two guidance for domestic services here](#) (English only), waxaad kaloo heli kartaa dulmar [Governor's Safe Start Washington plan here](#) (English only).

Xafiiska Magaalada ee Horumarinta Dhaqaalaha (OED) wuxuu leeyahay boga [comprehensive resource page](#) oo ilahiisu u dhameystirany yahiin ee ganacsiyada yar yar, hey'adaha aan macaash doonka aheyn, iyo shaqaalaha uu saameyey COVID-19. Boggan waa la cusbooneysiin doonaa markii macluumaad dheeri ah laga helo tilmaamaha Gobolka ee dib-u-furista ayaa la heli karaa.

Dulmar Guud

Intaas waxaa sii dheer, Gudiga heerarka Shaqaalaha guriga ee Seattle wuxuu leeyahay [webpage regarding best practices for domestic hiring entities and workers during COVID-19](#), oo ah Website , oo ay ku jirto tusaalaha heshiisyada qoraalka ah si looga caawiyo shaqaalaha iyo shaqaaleysiinta hey'adaha in ay

Xeerka Shaqaalaha Guriga

Xeerka Shaqaalaha Guriga ee Seattle (DWO) wuxuu aasaasayaa ilaalinta xquuqda shaqaalaha guryaha ee bixiya adeegyo lacagta lagu bixiyo mid shaqsi ama xubnaha guriga ama guri khaas ah sida, heynta carurrta, nadiifiyaha guriga, shaqaalaha daryeelka guriga, jardiinada, cunto kariye, iyo / ama maareeyaha guriga. Xeerku wuxuu dejinayaa xuquuqda shaqaalaha guryaha, oo ay ku jiraan:

1. Bixinta mushaharka ugu yar ee Seattle
2. Bixinta waqtiyada cuntada iyo nasashada
3. Bixinta nasiino maalin kadib marka aad shaqeyso in kabadan lix maalmood oo isku xigta (shaqaalaha ku nool oo kaliya)
4. Joojinta dukumiintiyada asalka ah ama saamaynta kale ee shaqsiyeed

Waxii macluumaad dheeri ah oo ku saabsan waajibaadkaaga sida sharciga waafaqsan, oo ay ku jirto qaabka lagugu ogeysiinayo xuquuqda aad siin karto shaqaalahaaga, waxaad booqata [Office of Labor Standards' DWO website](#), ama wac 206-256-5297, tarjumaad ayaa la helayaa.

Tag Qalabka Isticmaalka!


Qalabkan dib-u-furista waxaa soo saaray Magaalada Seattle, waxaana loogu talagalay in lagu bixiyo macluumaad la heli karo, heer-sare ah kuna saleysan tilmaamaha ay dejisay Waaxda Caafimaadka iyo Caafimaadka Dadweynaha - Seattle & King County si looga caawiyo shakhsiyadka, qoysaska, iyo ganacsigu si guul leh in ay dib ugu bilaabaan adeegyadii gudaha ee marxaladda 2-aad.

Inta lagu gudajiro howlaha wajiga 2 ee bilowga qorshaha amniga ee shaqqalaha guriga, Waaxda Caafimaadka Gobolka Washington waxay ubaahantahay in dhamaan shaqsiyaadka, qoysaska iyo meheradaha kaqeyb gala howlaha guriga iyo shaqaalaha adeega guryuhu ay u hogaansamaan bixinta qalabka ilaalinaya shaqaalaha (PPE) oo loogu tala galay shaqaalaha guriga iyadoon wax lacag ku joogin shaqaalaha; yareynaya is-dhexgalka fool-ka-foolka ah ee shaqaalaha guriga markasta oo ay suurtagal tahay iyo/ama aad ka tagto guriga markaad shaqada dhameyso oo aad si joogto ah u nadiifiso oo jeermiga ka disho qalabka iyo dusha sare.


Liiska Hubinta Wajiga 2 ee Adeegyada

Caafimaadka iyo Badbaadada Shaqaalaha


Hubso in aad bixiso jawi shaqo oo badbaado leh oo aad wacyi geliso shaqaalaha adeegga guriga wixii ku saabsan calaamadaha, astaamaha, iyo qodobbada halista ee la xiriira cudurka COVID-19, iyo sida looga hortago faafitaanka coronavirus-ka ee shaqada. Macluumaadkaani waa inuu ku jiraa tillaabooyinka lagu qaadayo goobta shaqada si bulshadu u kale dheraato, gacmo-dhaqid joogto ah, iyo taxaddarro kale, oo lagu bixiyo luqadda uu shaqaaluhu si wanaagsan u fahmo. Booqo bogga www.kingcounty.gov/covid si aad uga hesho hagista caafimaadka dadweyne in kabadan 30 luqadood.




- Markay suurtagal tahay, xubnaha reerku waa inay ka maqnaadaan guriga ama meel ka durugsan shaqaalaha guriga inta shaqada guryuhu socdaan.




- Hayso waraaqaha gacmaha la isga tiro, gacmo nadiifiyayaasha, jeermis-dilaha, iyo Qasac qashinka laga rido ee guriga iyo / ama goobta shaqada, iyada oo aan wax kharash ah ugu fadhiiyin shaqaalaha.



- Bixi oo sii shaqaalaha marada daboosha snaka iyo afka iyo gacngashi la tuuri karo marka la isticmaalo. Booqo seattle.gov/mayor/covid-19/seattle-protects si aad u hesho waji dabool adiga iyo shaqaalaha.




- Shaqaalaha guryuhu waa in ay awood u yeeshaan in ay soo gelikaraan gudaha banaankana uga bixi karaan guriga.




- Markay suurtagal tahay, dadka waaweyn iyo carruurta (ka weyn laba sano) waa in ay xirtaan wejiga oo ay ka fogaadan lix fiit shaqaalaha guriga oo ay soo gaabiyaan isdhexgalka fool ka foolka ah.




- Si joogto ah u nadiifi oo fayodhowr sheyga had iyo jeer la taabto iyo sagxadaha sida waxyaabaha gacanta lagu qabto, mashiinnada, faseexadaha albaabada iy musqulaha, iyo sidoo kale alaabada uu adeegsaday shaqaaluhu guriga markay dhammaadaan adeegyadu.




- Hubso gacmo-dhaqid joogto ah oo loogu talagalay shaqaalaha iyo xubnaha qoyska, oo ay ku jiraan ka hor iyo ka dib isticmaalka musqusha, ka hor iyo ka dib cunidda, iyo ka dib qufaca, hindhisada, ama duufsaneyso. Istimmaal galoofisyada istimaalidda halka mar la isticmaalo markii gacmo-dhaqistu aysan suurtagal ahayn.



- Haddii xubin ka mid ah qoyska uu leeyahay astaamaha COVID-19, waa in shaqaalaha lagu wargaliyaa ka hor inta aaney guriga imaan waa in la joojiyaa shaqada. Haddii xubin qoyska ka mid ah ama shaqaaluhu ay yeeshaan astaamo inta lagu jiro xilliga shaqada, shaqaalaha waa in loo diraa guriga.



- Haddii shaqaale guri laga filayo inuu dhammaystiro hawlo kale oo dheeri ah, sida nadiifin isdaba-joog ah iyo fayadhowr, tan waa in lagu muujiyaa heshiis qoraal shaqaalahana waa in magdhaw la siiyaa waqtiga dheeri ah.



- Gawaarida ay leeyihiin loo shaqeeyayaasha waa in si joogto ah loo nadiifiyaa waana in gacmaha la nadiifiye. Shaqaaluhu waa in ay gacmahooda nadiifiyaan inta aaney howsha bilaabin.

Waad ku mahadsan tahay iskaashigaaga!

Ilaha Kale

Haddii aad qabtid wax su'aalo ah oo ku saabsan macluumaadka soo socda, fadlan soo wac hay'adahaas. Markaad soo waceyso, hadaad ubaahantahay caawinaad luqadeed, fadlan noogu sheeg af ingiriiska luqada aad dooranayso. Mid ka mid ah shaqaale ku hadla labada luqadood ayaa ku soo waci doona, ama waxaan telefoonka ugu yeeri doonnaa turjubaan qolo saddexaad oo kaa caawiya wadhadalka.

Fadlan la soco in ay na soo wacayaan dad badan oo doonaya cawimaad, sidaa darteed waxay qadaneysoo in aad sugto wakhti dheer. Waxa kale oo aad sugi kartaa khadka talefoonka inta turjubaanka lagu soo xirayo.

Mawduucyada	Hey'ada	Telfoon lambar
<ul style="list-style-type: none"> Xeerarka Guud ee dib u furista. Xisaabinta inta qof eee markiiba joogi karto rugta ganacsiga. Barnaamijka Ilaalinta Jeegaga Deynta ah. Ka eeg websitka halkan here. Xeerarka wax ka badalida kirada iyo guryo ka saarista. Ka eeg websitka halkan here. Codsiga ogolaanshaha dibedda. 	Xafiiska Horumarinta Dhaqaalaha- Office of Economic Development	(206) 684-8090
<ul style="list-style-type: none"> Ilaha dhaqaale ee laga heli karo Magaalada, Gobolka iyo Dowlada Dhexe. Is Diiwaangelinta baaritaanka COVID-19 oo bilaash ah. Ka eeg websitka halkan here. 	Xafiiska Adeegga Macaamiisha -Customer Service Bureau	(206) 684-2489
<ul style="list-style-type: none"> Soo sheegida waxyabaha eexda ku saabsan. Ka eeg websitka halkan here. 	Xafiiska Xuquuqda Madaniga -Office for Civil Rights	(206) 233-7100
<ul style="list-style-type: none"> Talooyinka Caafimaadka Dadweynaha ee COVID-19. Ka eeg websitka halkan here. 	Caafimaadka Dadweynaha ee Seattle-King County- Seattle-King County Public Health	(206) 477-3977